



Offices of Finance and Human Capital

Nathan Kuder, Chief Financial Officer

Albert Taylor, Jr., Chief Human Capital Officer

Bruce C. Bolling Municipal Building TEL 617-635-9600 2300 Washington Street, 4th floor FAX 617-635-7956 Roxbury, Massachusetts 02119 www.bostonpublicschools.org

Xubnaha gudiga iskuulka ee qaaliga ah,

Fadlan qabso faylkaan kasocdo oo ka socda hay'adaha maamulka Dadweynaha Boston ee afarta iskuul Horace Mann Charter Schools (Boston Green Academy, Dudley Street Neighborhood Charter School, UP Academy Boston, iyo UP Academy Dorchester). Degmadu waxay taageertaa talo soo jeedintooda ah in la kordhiyo mushaharka xubnaha BTU, kuwaas oo hoos yimaada heshiiska gorgortanka wadajirka ah ee macalimiinta, si loo xisaabiyo saacadaha shaqada ee macalinka ee dugsi kasta.

Sida asalka ah, dhammaan dugsiyada hoose ee BPS iyo K-8 waxaa looga baahan yahay inay haystaan maalin la dheereeyey (Jadwalka A) ama waxay haystaan ikhtiyaarka madaxbannaanida. Dhammaan Iskuulada sare ee madaxbannaan ee BPS waxay leeyihiin ikhtiyaar ah malmo loo dheryay Haddii mid ka mid ah iskuulada ay doortaan maalintas la dheryay, waxay haystaan qayb ka mid ah saacadaha ay ku jiraan miisaaniyadda degmada. iskuulada maalinlaha ah ee kaliya ee la kordhiyey ayaa ka duwan afar ka mid ah lixda iskuul ee Horace Mann Charter (lixdun waa, Kennedy Health Careers, BDEA, Boston Green Academy, UP Boston, UP Dorchester, iyo Dudley Street Neighborhood Charter School). Xirfadaha Caafimaadka Kennedy iyo BDEA waxay ku jiraan Heshiiska iskuulada Tijaabada ee mushaharka wakhtiga dheer. Heshiiska kama xuso afarta dugsi ee kale: laba dugsi oo UP charter ah (Boston iyo Dorchester), Boston Green Academy, iyo Dudley Street Neighborhood Charter School.

Marka la soo koobo, afarta iskuul ee aan la xusin hadda waxay leeyihiin macalimiin shaqeeya saacado dheeraad ah, laakiin waxaa la siiyaa mushaharka iyadoo la isticmaalayo jadwalka mushaharka ee BPS ee macalimiinta shaqeeya maalin dhaqameed.

Xalka lagu taliyay waa seddex ka mid ah iskuulada Horace Mann Charter (UP Boston, UP Dorchester, Dudley Street Neighborhood Charter School) si ay ugu biiraan miisaanka mushaharka ee Jadwalka, haddii macalimiintu ay shaqeeyaan ugu yaraan isla tirada saacadood ee macalinka Jadwalka A. Boston Green Academy, taladu waa in la kordhiyo gunnada xubnaha BTU ee BGA si saacadaha dheeraadka ah ee shaqada ee ka badan iyo wixii ka dambeeya maalinta shaqada ee shaqaalaha dugsiyada sare ee dhaqanka loo helo magdhow si waafaqsan Qodobka III, Qaybta E (cutubyada i iyo ii kaliya) ee heshiiska gorgortanka wadajirka ah ee macalimiinta.

Tani waxay kaliya saamaynaysaa shaqaalaha waxbarida maadaama xirfadlayaasha ahi ay yihiin shaqaale saacade ah oo ay helaan mushahar maalintooda buuxda ee shaqada. Qiimaha lagu qiyaasay waa \$800,000, taas oo lagu dari doono miisaaniyada wakhtiga dheer ee degmadeena.

Fadlan ha ka waaban inaad nala soo xariiro haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah. Waxaan rajeyneynaa inaan ka doodno tan Febraayo 15-keeda shirka Guddiga Dugsiga.

si daacad ah,

Nathan Kuder

Madaxa Sarkaalka Dhaqaalaha

Albert Taylor

Madaxa Aadanaha e Raasamaal